

U dalbo sida uga dhakhsaha badan ee aad awoodi karto!

Dalbo magangalyo doonkaaga isla marka aad timaado (garoonka dayuuradaha ama dekedda) ama marka ad soo gasho gudaha waddanka Ingiriiska adigoo u sii maraya shaqaalaha bulshada ama shaqaale kale ee wax taageera. Adeegyada shaqada bulshada waxay kaa caawinayaan adiga inaad hesho qof si sharci ah kuu matala kaasoo ku caawin doona kuna hagi doona adiga inta ay socoto habka magangalyo doonkaaga.

Yaa adiga ku xanaanayn doona?

Adeegyada Shaqada Bulshada ayaa waxay ku siin doonaan lacag waxayna hubin doonaan inaad haysato meel aad ku noolaato. Tani waxa ay noqon kartaa qayb degaan ama xanaaneeyayaal ku taageera/ama dad sida waalid oo kale ah oo ku xanaaneeya. Waxaa sidoo kale ku arki doona dhakhtar.

Waraysigaaga Baarista

Waxaa lagaa codsan doonaa inaad timaado Hay'adda Xuduuda & Socdaalka (Wasaarada Arrimaha Gudaha) adigoo ay ku wehliyaan shaqaalaha bulshada ama qof wakiil kaa ah oo ku meel gaar ah. Waxaa lagu bari doonaa qofka kiiskaaga haya. Qofkani waa qofka ka socda wasaarada Arrimaha Gudaha ee masuulka ka ah kiiskaaga. Waxay ku waydiin doonaan su'aalo ku saabsan sababta aad u timid waddankan Ingiriiska waxayna ku siin doonaan:

- Waraaq kuu ogolaanaysa inaad waddanka joogto inta ay ka gaarayaan go'aan codsigaaga. Waraaqdan waxaa la yiraahdaa IS96.
- Foomka Caddaynta Qoraalkaaga (Statement of Evidence Form) (SEF).

Buuxinta foomkaaga SEF

Halkani waa meesha aad ku sheegayso sheekadaada. Waa inaad qortaa foomka adigoo la kaashanaya qofka sharciga ah ee ku matalaya. Shaqaalahaaga bulshada iyo wakiilkaaga waa inay joogaan kulankan. Waxaad haysataa 20 maalmood inaad ku soo celiso foomkan. Inta waqtigan lagu jiro qofka kiiskaaga haya ayaa kula soo xiriiri doona si uu kaala xaajoodo waxa ku dhici doona codsigaaga.

Waraysi kale?

Haddii waaxda socdaalka ay qabto su'aalo dheeraad ah waxa dhici karta inay kaa codsadaan adiga inaad u timaado waraysi kale. Qofka sharciga ee ku matalaya ayaa kuu sharxi doona adiga.

Xaadiritaanka (Reporting)

Waxaa dhici karta in lagaa codsado inaad si joogta ah isaga xaadiriso xarunta isxaadirinta ee xafiiska wasaarada Arrimaha Gudaha ee degaankaaga. Waa inay arrintan kala xaajoodaan adiga iyo shaqaalahaaga bulshada.

Go'aankaaga

Wasaarada Arrimaha Gudaha ayaa waxay go'aan ka gaari doonta nooca sharciga magangalyo ee aad heli doontid: Sharciga Qaxootinimo (Refugee Status), Sharciga Ilaalada Bani'aadnimo (Humanitarian Protection), Ogolaansho joogis oo go'aan gaar ah (Discretionary Leave) ama diidmo. (Eeg erey bixinta sharraxaada waxa ay ereyadan la macno yihiin.)



Kuma faraxsanid go'aankaaga?

Adiga ama qofka sharciga ee ku matalaya waa inay racfaan u qaataan Maxkamadda Socdaalka iyo Magangalyada (Asylum and Immigration Tribunal) (AIT) 1 illaa iyo 10 maalin gudahood marka aad hesho go'aankaaga.

Waad ku faraxsan tahay go'aankaaga?

Haddii aad haysato foomka joogitaanka ku meel gaarka ah waa inaad la xiriirtaa qofka sharciga ee ku matalaya dhowr bilood ka hor inta aysan joogitaankaaga dhamaan si ay markaas u helaan waqti ay ku dalbadaan in la sii dheereeyo.

Xasuuso haddii ay kaa dhigayso adiga inaad dareento qanacsanaan waad codsan kartaa kiis haye lab ama dheddig ah iyo tarjumaan mar walba oo aad waraysi la leedahay wasaarada Arrimaha Gudaha.